رسالة في معنى الطاغوت

Risaalada Macnaha Taghuutka

HORDHAC

Mahad oo dhan Ilaahay ayay u sugnaatay, naxariis iyo nabadgelyona ha ahaato Nabi Muxammad ﷺ.

Buuggan waa turjumaadda Af-Soomaaliga ee risaaladda "رسالة في معنى الطاغوت" oo uu qoray Sheekh Muxammad bin Cabdulwahaab (Alle ha u naxariistee).

Ujeeddada turjumaaddan waa in qofka Af-Soomaaliga ku hadla uu si fudud u fahmo macnaha risaaladda, iyadoo la ilaalinayo macnaha asalka ah. Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah waxaa loo daayay sidii ay u soo degeen, waxaana hoostooda lagu qoray macnahooda Af-Soomaali.

Waxaan Alle ka baryaynaa inuu camalkan ka dhigo mid daacad loogu sameeyey Wajigiisa Kariimka ah, kana dhigo mid anfaca qof kasta oo akhriya ama gaadhsiiya walaalihiis Muslimiinta ah.

Waxaa Turjumay: Cabdi Raxmaan Sheekh bashiir

بسم الله الرحمن الرحيم

Ogow – Ilaahay ha kuu naxariistee – in waxa ugu horreeya ee Ilaahay ku waajibiyey ubadka Aadam ay yihiin in lagu gaaloobo Taghuutka iyo in Ilaahay la rumeeyo.

والدليل قوله تعالى:

وَلَقَدْ بَعَثْنَا فِي كُلِّ أُمَّةٍ رَسُولًا أَنِ اعْبُدُوا اللَّهَ وَاجْتَنِبُوا الطَّاغُوتَ

Macnaha:

Waxaan ummad kasta u dirnay Rasuul isagoo leh: "Caabuda Ilaahay, kana fogaada Taghuutka."

Sifada lagu gaaloobo Taghuutka

Sifada loogu gaaloobo Taghuutka waa inaad rumaysnaato in cibaadada loo sameeyo wax aan Ilaahay ahayn ay baadil tahay, aad ka tagto, aad nacdo, gaalaysiiso kuwa ku dhaqma, cadownimana u muujiso.

Macnaha Rumaynta Ilaahay

Macnaha rumaynta Ilaahay waa inaad rumaysnaato in Ilaahay keligiis yahay Ilaaha xaqa ah ee la caabudo, dhammaan noocyada cibaadadana isaga u kali yeesho, kana leexiso cid kasta oo aan isaga ahayn
Sidoo kale waa inaad jeclaataa dadka Tawxiidka ku sugan, garab istaagtaa, nacdaa dadka shirki ku sugan, cadownimana u muujisaa

والدليل قوله تعالى:

قَدْ كَانَتْ لَكُمْ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ فِي إِبْرَاهِيمَ وَالَّذِينَ مَعَهُ إِذْ قَالُوا لِقَوْمِهِمْ إِنَّا بُرَآءُ مِنْكُمْ وَمِمَّا تَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ كَفَرْنَا بِكُمْ وَبَدَا بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمُ الْعَدَاوَةُ وَالْبَغْضَاءُ أَبَدًا حَتَّىٰ تُؤْمِنُوا بِاللَّهِ وَحْدَهُ﴾

Macnaha

Waxaa idiinku sugan tusaale wanaagsan Nabi Ibraahim iyo kuwii la jiray, markii ay ku yidhaahdeen qoomkoodii: "Annagu waan idinka barii nahay idinka iyo waxaad Ilaahay ka sokow caabudaysaan. Waan idin diidnay, waxaana noo dhexeeyey annaga iyo idinka colaad iyo nacayb joogto ah ilaa aad ka rumaysaan Ilaahay keligiis."

Waa Maxay Taghuut?

Taghuut waa wax kasta oo Ilaahay ka sokow la caabudo, isagoo ku raalli ah in la caabudo, ama la raaco, ama la adeeco wax ka hor imanaya adeecidda Ilaahay iyo Rasuulkiisa.

Taghuutyadu way badan yihiin, hase yeeshee madaxdoodu waa shan.

Koowaad

Shaydaanka dadka ugu yeera cibaadada wax aan Ilaahay ahayn.

والدليل قوله تعالى:

﴿أَلَمْ أَعْهَدْ إِلَيْكُمْ يَا بَنِي آدَمَ أَنْ لَا تَعْبُدُوا الشَّيْطَانَ ۖ إِنَّهُ لَكُمْ عَدُوٌّ مُبِينٌ﴾

Macnaha:

Miyaanan idinku dardaarmin, ubadka Aadamow, inaydaan caabudin Shaydaanka? Hubaal wuxuu idiin yahay cadow cad.

Labaad: Xaakinka dulmiga badan ee beddela xukunnada Ilaahay.

والدليل قوله تعالى:

أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ يَزْعُمُونَ أَنَّهُمْ آمَنُوا بِمَا أُنْزِلَ إِلَيْكَ وَمَا أُنْزِلَ مِنْ ۖ قَبْلِكَ يُرِيدُونَ أَنْ يَتَحَاكَمُوا إِلَى الطَّاغُوتِ وَقَدْ أُمِرُوا أَنْ يَكْفُرُوا بِهِ وَيُرِيدُ الشَّيْطَانُ أَنْ يُضِلَّهُمْ ضَلَالًا بَعِيدًا

Macnaha:

Miyaadan arag kuwa sheeganaya inay rumaysan yihiin wixii lagugu soo dejiyey adiga iyo wixii lagu soo dejiyey kuwii kaa horreeyey, haddana doonaya inay isu xukumaan Taghuut, iyadoo lagu amray inay ku gaaloobaan? Shaydaankuna wuxuu doonayaa inuu si fog u dhumiyo.

Saddexaad

Qofka ku xukuma wax aan Ilaahay soo dejin.

والدليل قوله تعالى:

﴿وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ

Macnaha:

Qofkii aan ku xukumin waxa Ilaahay soo dejiyey, kuwaas iyaga ayaa gaalo ah.

Afraad

Qofka sheegta inuu og yahay cilmiga waxa qarsoon (Ghaybka) isagoo aan Ilaahay ahayn.

والدليل قوله تعالى:

﴿عَالِمُ الْغَيْبِ فَلَا يُظْهِرُ عَلَىٰ غَيْبِهِ أَحَدًا ۝ إِلَّا مَنِ ارْتَضَىٰ مِنْ رَسُولٍ﴾

Macnaha:

Ilaahay waa Ogaha waxa qarsoon, mana ogeysiiyo cilmigaas cidna, marka laga reebo Rasuul uu doortay.

Shanaad

Qofka Ilaahay ka sokow la caabudo isagoo ku raalli ah in la caabudo

والدليل قوله تعالى

﴿وَمَنْ يَقُلْ مِنْهُمْ إِنِّي إِلَٰهٌ مِنْ دُونِهِ فَذَٰلِكَ نَجْزِيهِ جَهَنَّمَ ۚ كَذَٰلِكَ نَجْزِي الظَّالِمِينَ﴾

Macnaha:

Qof kasta oo yidhaahda: "Anigu waxaan ahay ilaah Ilaahay ka sokow la caabudo," waxaa abaalmarintiisu noqonaysaa Jahannamo. Sidaas ayaannu u abaalmarinnaa daalimiinta.

Kadibna ogow in qofku uusan noqonayn mu'min dhab ah ilaa uu ku gaaloobo Taghuutka

والدليل قوله تعالى:
﴿فَمَنْ يَكْفُرْ بِالطَّاغُوتِ وَيُؤْمِنْ بِاللَّهِ فَقَدِ اسْتَمْسَكَ بِالْعُرْوَةِ الْوُثْقَىٰ لَا انْفِصَامَ لَهَا ۗ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ﴾

Macnaha:

Qofkii ku gaalooba Taghuutka, rumeeyana Ilaahay, wuxuu qabsaday xarigga ugu adag ee aan go'i doonin. Ilaahayna waa Maqle, wax walbana Og.

waa diintii Nabi Muxammad ﷺ الرشد

waa diintii Abuu Jahal. الغي

waa kalmadda: العروة الوثقى

«لا إله إلا الله»

Kalmaddani waxay xambaarsan tahay laba arrimood:

• Waxay diidaysaa in cibaado nooc kasta leh loo sameeyo cid aan Ilaahay ahayn.

• Waxayna sugaysaa in dhammaan noocyada cibaadada loo kali yeelo Ilaahay oo aan wax shariik ah lahayn.

الحمد لله أولًا وآخرًا، وصلى الله على خير خلقه محمد وآله أجمعين.

Mahad oo dhan Ilaahay baa leh, bilow iyo dhammaadba. Naxariis iyo nabadgelyona ha ahaato makhluuqa ugu khayrka badan, Nabi Muxammad ﷺ, ehelkiisa iyo dhammaan asxaabtiisa.